



**S T A R T
U P R E F
U G E E S**

**TILMAAMAHA QUSEEYA GANACSATADA
OO KU SAABSAN CUDURKA
CORONAVIRUS**

TABLE OF CONTENTS

- 1 Waxa la sameeyo marka lacagtu dhamaato**
- 2 Waxa lagu sameeyo shaqaalaha**
- 3 Sida loo maareeyo ganacsiga hadda iyo mustaqbalka**
- 4 Talooyin ku saabsan maqaayadaha, kafateeriyada iyo milkiilayaasha baararka**
- 5 Linkiyaasha si aad u hesho macluumaad dheeraad ah**

11.05.2020



1 Liiska waxyaabaha la sameeni karo si loo yareeyo dhibaatooyinka dhaqaalaha oo ku saabsan ganacsiyada yaryar:

- Ha argagixin. Iska ilaali hagaajinta degdega ah. Fiiri sawirka weyn ee xaaladaada ganacsi. Dadku waxay gaadhaan go'aano xun markay argagaxaan.
- Ha qaadanin deen deg-deg ah (**pikavippi**) xitaa haddii ay u muuqato wax fudud. Deenta deg-dega waa lacag aad u qaali ah waxayna kuu horseedi doonaan dhibaatooyin badan mustaqbalka.
- Samee qorshe 6 bilood ah iyo duruufo kala duwan oo mustaqbal ah oo macquul ah sida iibkaaga iyo baahidaada lacageed ay u horumarin karaan. Qorshee waxaad samayn lahayd hadda iyo waxaad samayn lahayd haddii loo baahdo.
- Haddii aad ka qaadatay bankiga deen, ka wada hadal dib u dhigista ama yareynta dib u bixinta deynta bangigaaga. Xasuusnow mar walba waa inaad heesataa cadeemo qoraal ah si aad iskaga ilaaliso dhibaatooyinka ka imaan kara.
- Haddii aadan filaynin inaad hesho dakhli badan bilaha soo socda, 0€ ku baddal lacagta canshuurta aad bixisid vero.fi
- Weydiiso waqti dheeri ah oo aad ku bixiso ajuurada EYL & TYEL.
- Baddal ama ka joojiso heshiiskaaga qandaraasleyaasha.
- Mulkiilahaaga kala gorgorton baajinta ama yareynta kirada si ku meelgaar ah. Waa inaad heesataa cadeemo qoraal ah si aad iskaga ilaaliso dhibaatooyinka ka imaan kara, Emayl oo aad ka heshid ayaa kugu filan.
- Kaydso wax yar. Haddii aad sameysay amarro aan weli imaan, iskuday inaad la xaajooto sidii aad u bedeli lahayd amarradaada.
- Iskuday inaad hesho dib u bixinta badeecadaada, qaasatan haddii aad sameysid ama aad u sameysid iyaga oo raacaya amarrada. Way fiicantahay in la hubiyo macluumaadka deynta ee amarrada waaweyn horey loo sii qaado si looga fogaado dhibaatooyinka Suomen Asiakastieto Oy iyo Bisnode eey keeni karaan.



- Kala hadal waqti dheeraad ah oo bixinta biilasha.
- Ma qabataa ganacsiga B2B? Haddii aad badeecado ka iibisay macmiil laakiin mar dambe ayay ku siin doonaan ama ay caqabado ka qabaan bixinta biilasha, waxaad ka iibin kartaa qaansheegyadaaga shirkad qaan-sheegasho (laskurahoitus). Waxay ku siinayaan wadarta aad ka sugayso macaamiishaada isla markaaba waxayna sii wadaan qaansheegta macaamiishaadii hore. Adeeggoodu wuxuu ku kacayaa 2-10% ee wadarta biilkii asalka ahaa.
- Shirkadaha qaan-sheegashada qaar ka mid ah: [Rahoittaja](#), [Arex](#), [Rahoittamo](#), [Svea](#)
- Sii shaqaalaha ogeysiiska nasashada ugu yaraan 14 maalmood kahor. Sharciga uu gaaran waqtigaan wuxuu kuu ogolaanayaa inaad shaqada ka ceyriso mise ka fadhiisiso shaqaalaha muddo ogeysiis ah oo ka gaaban hishiiskii hore.
- Wac Yritys Suomi Talousapu caawinaad talosiinta dhaqaalaha Tel. 358 295024882, caawinaad Af Ingiriis ah Talaadada iyo Jimcaha 9.00- 16.00. Caawinaada waa bilaash.

Xagee laga codsadaa kaalmada lacageed ee shirkaddaada haddii aad kulanto xaalad dhaqaale oo adag iyadoo ay ugu wacan tahay fayraska COVID-19:

Waxaa jira ururo badan iyo shabakado iskaa wax u qabso ah kuwaas oo bixiya caawimaad bilaash ah bas adiga waxaa lagaa rabaa inaad buuxisid foomamka codsiga oo kaa caawinaya maalgelinta ganacsiga. Foomomka adiga ayaad buuxini karto marka haku khasaarinin lacagtaada in aad shirkad kaley wax yaalahaas kuu qabato.

1 Degmooyinka

- Ganacsatayaasha kalida ah (toiminimi) waxay degmadooda ka dalban karaan 2000€ ilaa ilaa 30.9.2020 oona loogu tala galay dadkoo karna feyrus u geystay ganacsigooda dhibaatooyin.
- Guud ahaan, deeqdu waa bixinta kirada, biilasha iyo kharashyada kale ee shirkadda



Wax saameyn kuma lahaani doonto lacagta shaqo la'aanta aad ka heshid Kelada.

- Kuwani waa deeqo mana ahan inaad dib u soo celiso.
- Magaalo walbaa waxay leedahay foom codsi u gaar ah, hadaba fiiri bogga internetka ee magaalada aad degantahay shirkadaada (meesha ay ka diiwan gashantahay).

[-Caawinta Magaalada Helsinki](#)

2 ELY centres

- Shirkadaha yaryar (ugu badnaan 5 shaqaale) ayaa dalban kara maalgelin loogu talagalay horumarinta ganacsiga xarumaha ELY. Ganacsatada kaligood (toiminimi) ah ma heli karaan. Ugu badnaan 10 000 € marka la sameeyo falanqaynta xaaladda ama ugu badnaan 100 000 € mashruuc horumarineed.
- Kama codsan kartid deeqaha labada meel (Business Finland iyo ELY). Waxaad ubaahantahay inaad dooratid adigoo ku saleynaya nooca shirkadaada midka adiga kugu habboon.

[Macluumaad dheeri ah](#)

[Suomen Yrittäjät maqaal ku saabsan sida loo dalbado maalgalinta ganacsiga](#)

3 Business Finland

- Shirkadaha xaddidan ee yar yar iyo kuwa dhexdhexaadka ah (**oy, oyj, ay, ky, osk** oo leh 6-250 shaqaale waxay dalban karaan maalgelin (ugu badnaan 10 000 €) horumarinta ganacsiga tusaale ahaan qorsheynta nashaadaadyo ganacsi oo cusub, silsilado bixin kale iyo dib u habeyn ee wax soo saarka iyo hababka shaqada.
- Haddii aad heshid maalgelinta horumarinta ganacsigaaga, ka dib waxaad dalban kartaa maalgelin kale oo aad ku meelmarin karto qorshayaashaada taasuu na ka dalbaneesid Business Finland, ugu badnaan. 100 000 €.
- Kuwani waa deeqo mana ahan inaad dib u soo celiso.
- [Halkan ka codso ayadoo onlayn ah](#)



4 Finnvera

- Finnvera waxay ku siin kartaa deyn wadaag (dammaanad) markaad ka dalbaneysa bankiga deyn.
- [Macluumaad dheeri ah](#)

5 Kela

- Ganacsadayaasha aan ganacsigooda sii wadan karin sababta oo ah cudurka 'karonafeyrus' ama dakhligoodu ka yar yahay 1089,67 €/bishii, waxay ka codsani karaan Kelada faa'iidooyinka ku meelgaarka ah ee shaqo la'aanta iyagoo aan xireynin ganacsigooda.
- Caawinaada lacageed waa 724€/bishii waqtiga oo ah 16.3. – 30.6.2020. Ganacsatada waxaa looga baahan yahay inay iska diiwaangeliyaan xafiiska shaqada (**TE-toimisto**) iyagoo sheeganaayo iney shaqo la'aan yihiin ka dibna waxay ka dalban karaan Kelada.
- Ganacsadaha leh dakhli hooseeya wuxuu xaq u yeelan karaa kaalmada guud ee Kelada iyo kaalmada bulshada. Haddii dhaqaalahaagu xun yahay, ka codso bogga Kelada. Kani waa habka kaliya ee lagu ogaanayo hubaal in adiga iyo reerkaaguba aad heli kartaan gargaarka bulshada.
- [Halkan ka codso](#)

Sida loo xiro ganacsigaaga si joogto ah ama gabigiisa dhan

- Waxaa la dhahay, ganacsiga waxaad si fiican u baraneysa marka aad la kulanto xaalad kacsanaan. Maaha wax laga xishoodo in la xiro ganacsigaaga. Waxaad bilaabi kartaa ganacsi cusub mar dambe.
- Waxaad si ku meel gaadh ah u xiri kartaa ganacsigaaga muddo wakhti ah. Waa inaad



wargalisaa xiritaanka kuwa qaabilsan dhinaca ganacsiga Maamulka Canshuuraha adoo adeegsanaya foomamka [halkan](#).

- Xiritaanka shirkad si joogto ah waqti ayey ku qaadataa Finland, gaar ahaan shirkadaha xaddidan (**OY**), oo ay qaadanayso ugu yaraan 5 bilood. Xiritaanka shirkadaha waxeey fudutahay marka eey shirkada hoos u dhacdo.
- Nidaamka iyo kharashyada lagu dhammeeyo meheraddu waxay kuxirantahay nooca sharciga ee shirkada (shirkad xadidan, kaligeed ganacsade iwm). Shirkad qaan ah oo xadidan qarashka waraaqaha qasabka ah ayaa ka badan 400 €, laakin ganacsade kaligiis ah (**toiminimi**) waa bilaash.
- Tallaabooyinka aad qaadani kartid sida loo xirayo shirkaada:
- Qabanqaabi Shirka Guud ee rasmiga ah ee shirkaddaada iyadoo la raacayo qawaaniinta shirkadda. Go'aan ka gaadha xirista shirkadda, oo qor daqiiqada oo ku saabsan go'aannada oo saxeex ah.
- Samee Bayaanka Maaliyadeed ee ugu dambeeya. Waxay u badan tahay inaad u baahan tahay buug-haye si uu taas u sameeyo.
- Xir ganacsigaaga adigoo ogeysiinaya diiwaangelinta rasmiga ah ee [YTJ](#).
- Haddii aad la kulanto ganacsi hoos u dhac, waxaad sameeni kartaa ganacsi hoos u dhac codsi ah, adigoo ka codsanaayo maxkamadda deegaanka ah. Waxaad caawimaad ka heli kartaa Wakiilka [Musalafnimada](#).
- Waa inaad kaydissaa dhammaan heshiisyada iyo kaydinta buugyaraha ugu yaraan 10 sano, sida sharciga uu qabo. Ogeysiis inaad heli kartid biilal dhinaca xafiiska cashuurta ka dib xiritaanka ganacsigaaga. Wali waa inaad iyaga bixisaa.
- Faahfaahin dheeri ah: [PRH](#) and [Suomi.fi](#)

2 Koronavirus waxoo ku qasbay dadka shaqada bixiyo inee shaqaalaha shaqada ka fadhisiyaan sababto oo ah shaqo la'aanta jirto.



Talooyin ku saabsan hogaaminta wanaagsan markii lagu jiro dhibaatooyin saan camal ah:

- Degnaansho la'aanta iyo cabsida ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn ee haysta ganacsatada waqtiga dhibaataada. Si aad u yareeso kuwan, ka ilaali inaad lasocodsii shaqaalahaaga xaaladaada ganacsiga. Sii digniin hore haddii ay umuuqato in ay tahay inaad yareysid saacadaha shaqada ama aad shaqo dhiibi karin.
- Aaminaadu waa waxa ugu muhiimsan ee hogaaminta inta lagu jiro qalalaasaha. Aaminaadu waxay ku dhisantahay furfurnaan, muujinta naxariis, daryeel, iyo awoodda aad u horseedi karto shaqaalahaaga mustaqbalka.
- Noqo bini'aadam oo u oggolow shaqaalahaaga inay muujiyaan shucuurtooda (jahwareer, cabsi iyo wax yaalo kalay oo badan) oo dhageyso fikradooda. In la maqlo ayaa ka muhiimsan bixinta jawaabaha saxda ah.
- Dhiirrigeli oo bixi ra'yi celin si aad uga dhigto jawiga shaqadu inuu fiicnaado xitaa haddii qofwalba uu mashquul yahay ama haddii aysan jirin shaqo ku filan.

Su'aalo ka yimid milkiilayaasha waxaa ka mid ah:

Sideen baa shaqada ugu fadhiisini karaa shaqaalaha?

Mushaar inaa bixiyo miyaa markaan bixiyo ogeysiis nasasho ah?

Maxaa dhacaya haddii aan doonayo in shaqaalahayga ay shaqada, ku soo noqdaan?

- Haddii aadan haysan shaqo kugu filan ama aadan awoodin inaad mushahaar bixiso, waxaad si ku meel gaar ah ugu oggolaan kartaa inay shaqada ka fariistaan waqti yar. Qandaraaska shaqadu weli wuu shaqeynayaa laakiin shaqaalahaaga ma shaqeeyaan mana bixin doontid mushaar. Haddii ay cadahay inaadan siin karin shaqo mustaqbal sidoo kale, waad eryl kartaa shaqaalahaaga heshiiska shaqadana wuu ka dhamaan doonaa.
- U hormari shaqaalahaaga warqad/emayl ogeysiis ah oo, ku saabsan nasashada. Sida caadiga ah waa inaad ogeysiisa mudo 14 malmood ka hor, laakiin qaar ka mid ah



ururada shaqaalaha (sida ururka adeegga PAM) ayaa ogolaaday in loo shaqeeyayaashu ay hadda siini karaan 5 maalmood ka hor. Ku qor ogeysiiska nasashada:

- Sababta shaqo ka fadhiisinta
 - Haddii shaqadu oo dhan joogsato ama haddii saacadaha shaqada eey yaraani doonto.
 - Waqtiga eey fadhiisinta bilaabanayso
 - Muddo intee le'eg ayay soconaysaa (waad bixin kartaa qiyaas)
- Shaqaalaha mushaarkiisa waa inay sii ahaataa isla sidii ilaa maalinta shaqo ka fadhiisinta timaado – xitaa haddii ganacsigaagu xirmaa goor hore. Marka waqtiga joojinta imaado waa inaad joojisaa bixinta mushaarka iyo shaqaalaha waa iney joojiyaan shaqada. Ku dhiiri gali shaqaalahaaga aa ka fadhiisay shaqada iney iska diiwaangeliyaan TE-xafiis (xafiiska shaqada) shaqo-doon ahaan iyo ay codsadaan lacagta shaqo la'aanta.
 - Waa inaad soo afjartaa shaqo ka joojinta haddii aad rabto in shaqaalahaagu ku soo noqdaan shaqada. Ma waydiin kartid shaqaalahaaga inay si ku meelgaar ah u shaqeeyaan inta lagu jiro shaqo joojinta. Shaqeynta ku-meelgaar ah waxoo ku eg yahay taariikhda lagu sheegay ogeysiiska waraaqada shaqo ka nasinta. Shaqaalaha fasaxa ku jira ilaa ogeysiis kale waa in la ogeysiyyaa ugu yaraan hal usbuuc ka hor intaan si kale lagu heshiin

[Ka eeg macluumaad dheeri ah oo, ku saabsan shaqo ka fadhiisiinta](#)

Isbuucii hore waxaan go'aansanay inaa ka jawaabno su'aalaha ganacsatada cusub eey na weeydiyeen oo ku saabsan xaaladaha Koronavirus (COVID-19). Halkaan waxaa ugu jawaabi doonnaa su'aasha labaad.



Sidee baan ganacsigeega usii wadani karaa haddeey xaaladda ay sii socoto bilo? Ma isiini kartaa wixii talooyin ah ee, ku saabsan sida qasaaraha looga soo kabsado?

- Haa, waxaa laga yaabaa inay jiraan fursado badan oo, ku saabsan sida qasaaraha looga soo kabsado. Wax yaalaha eey noqoni karaan tusaale ahaan waxaa ka mid ah:
- U bandig macaamiishaada ikhtiyaar oo ah inaa guriga ugu geen kartid adeegga mise badeecada.
- Ka ganacso kaararka hadiyadaha oo la bixin doono markoo joogsado faafida cudurka.
- Wax ka baddal ganacsigaaga si aad ugu adeegtid dadka karantiil ku jira: Dadka da'da ah ama waalidiinta waxay u baahan yihiin adeeg dheerad ah waqtigaan lagu jiro.
- U adeeg dadka kula nool dabaqa dagan tahay.
- Raadi hab cusub oo aad macaamiishaada ugula xiriirto qadka, si aad ku siiso khibradaha khadka iyo qaabab cusub oo dadka ku caawiya iney waqti ku qaatan guryahooda.
- La shaqee shirkadle kale sidii aad u abuuri lahayd adeegyo cusub ama aad u wada gaari lahayd kooxo macaamiil cusub ah.
- U Isticmaal dukaanka ama bakhaarka goobta ganacsigaaga keyd si looga gudbo xaaladda. Tusaale ahaan: hudheelada qaar waxay u bedeleen qolalkooda xafiis shaqo.

Sideen ku hubiyaa in shaqaalahayga iyo macaamiishayda ay ka nabad galaan Koronavirus?

Wax yaabaha ee ku nabad geli karaan shaqaalaha iyo macaamiisha, waxaa ka mid ah:



- Hubi nadaafadda ineey kuu tahay wax mahiim ah. Ogeysii qof walba inuu dhaqo gacmahooda uu isticmaalo galoofis. U bandhig daawada gacmaha nadiifiso.
- Usheeg ama xasuusi shaqaalahaaga in ee udhawaanin macaamiisha
- Haddii ay suurtagal tahay, u adeegso shaqaalahaaga saacado ku haboon waqtigaan hadda lagu jiro. Tani waxay yareynaysaa tusaalo ahaan shaqaalaha haduu isticmaalo gaadidka shacabka si joogto ah iyo tirada shaqaalaha ku sugan goobta shaqada isla waqtigaas.
- Hogaami shaqaalahaaga iyo iska hubi inay ka taxadderaan naftooda oo ay raacaan tilmaamaha badbaadada iyo nadaafadda oo la siiyay.
- Hubso in shaqaaluhu joogaan guriga haddii ay jiran yihiin.
- Haddii aad ka shakisan tahay in uu kugu dhacay cudurka loo yaqaan coronavirus (COVID-19). La xiriir takhtarkaaga adeegga caafimaadka ama xarunta caafimaadka deegaankaaga. Talo ahaan waa inaad telefoon kala xiriirtaa.
- U sheeg macaamiishaada faahfaahinta iyada oo loo marayo warbaahinta bulshada iyo booska shaqada sida aad u daryeesho nadaafadda, gaar ahaan ficillada khaaska ah sida nadiifin dheeraad ah ama xaddidaysa tirada macaamiisha dukaankaaga / makhaayaddaada. Tani waxay abuurtaa kalsooni.
- Weydii sida uu qof walba u yahay. Waxaan kujirnaa waqtiyo adag oo dhamaanteena u baahan nahay saaxiib.
- Faahfaahin dheeraad ah, ka eeg tilmaamahaan ay soo diyaarisay Machadka Caafimaadka Shaqada ee [Finnishka](#)

Waxa la sameeyo haddii adiga ama xubin ka mid ah shaqaalahaagu eey xannuunsato ama eey yeelan karaan astaamaha COVID-19:

- Kela waxay bixin kartaa lacagta jirrada faafa marka ganacsadaha lagu amro inuu ka maqnaado shaqada, go'doomin ama karantiil looga hortago faafitaanka cudurada faafa, sida coronavirus. Haddii ganacsaduhu uu ku bukoodo cudurka, wuxuu xaq leeyahay kaalmada jirrada ee ay bixiso Kela.



- Talo soo jeedintu waxay tahay in shaqaaluhu joogaan guriga isla marka calaamadaha soo baxaan ayagoon u booqan dhakhtar si ay u soo qaataan cadeyn. Xilliga gunnada bukaanka (1 + 9 maalmood) wuxuu bilaabmaa marka shaqaaluhu u sheego loo shaqeeyaha.
- Loo shaqeeyuhu waa inuu siiyaa mushaar shaqaale illaa iyo dhamaadka maalinta 9aad ee jirrada. Haddii jirradu sii dheeraato, qofka shaqaalaha ahi wuxuu Kelada ka dalban karaa lacag maalmeedka jirada. Wadarta ayaa ku saleysan mushaarka shaqaalaha.

[Macluumaad dheeri ah](#)

3 Sida ganacsiga loo maareeyo si caqliyeesan hadda iyo mustaqbalka

Ka taxadir nafsataada

- Rajo ayaa jirta inta aad haysatid furayaasha albaabka shirkaddaada. Xaaladdaani way na dhaafi doontaa waana ka badbaadi doonnaa Insha allah.
- Ku dhaqan jadwalka joogtada ah. Ka taxadar hurdadaada, cun wax caafimaad leh iyo xasuuso inaad jimicsato.
- Yaree wakhtiga daawashada wararka iyo warbaahinta bulshada haddii ay walaac kugu kiciso.
- Hel taageero asaaga ah oo dareenkaaga la wadaag ganacsatada kale. Waxaa laga yaabaa inay hayaan tusaalooyin fiican oo ku saabsan sida loo maareeyo dhibaatooyinkaaga.
- Waxa jira mutadawiciin badan oo xirfad-yaqaanno ah oo caafimaadka maskaxda oo bixiyo caawimaad bilaash ah:

-Kriisipuhelin oo Ingiriis ah iyo Carabi ah 09-2525 0113 Isniinta-saacaddu markay tahay 11.00-15.00, Arbacada 13.00-16.00 iyo 17.00-21.00 iyo Thu 10.00-15.00, iyo finnishka 09-2525 0111 oo furan 24/7



-La-taliyayaasha ganacsiyada

-Ku biir kooxda Facebook “Osta pieneltä” ama ganacsatada yaryar (oo ku qoran Af-finnishka): Su’aalaha iyo jawaabaha, macluumaadka iyo taageerada nafsadda iyo taageerada asxaabta: [Osta Pieneltä](#)

Sida dib loogu fikiro ganacsigaaga

U fiirso xaalada fursad ahaan si aad ku hesho noocyo cusub oo macaamiil ah iyo oo aad u abuuri karto alaabooyin iyo adeegyo cusub oo caawin doona dadka xilligan gaarka ah:

- U bandig macaamiishaada ikhtiyaar oo ah inaa guriga ugu geen kartid adeegga mise badeecada
- Ka ganacso kaararka hadiyadaha oo la bixin doono markoo joogsado faafida cudurka.
- Wax ka baddal ganacsigaaga si aad ugu adeegtid dadka karantiil ku jira: Dadka da’da ah ama waalidiinta waxay u baahan yihiin adeeg dheerad ah waqtigaan lagu jiro.
- U adeeg dadka kula nool dabaqa dagan tahay.
- Adeegso aaladaha internetka ee la bilaabay in lagu taageero meheradaha ku jira xaaladda fayraska corona tusaale ahaan. [Sisumarket](#) iyo [Mesenaatti](#).
- Raadi hab cusub oo aad macaamiishaada ugula xiriirto qadka, si aad ku siiso khibradaha khadka iyo qaabab cusub oo dadka ku caawiya iney waqti ku qaatan guryahooda.
- La shaqee shirkadle kale sidii aad u abuuri lahayd adeegyo cusub ama aad u wada gaari lahayd kooxo macaamiil cusub ah.
- U Isticmaal dukaanka ama bakhaarka goobta ganacsigaaga keyd si looga gudbo xaaladda. Tusaale ahaan: hudheelada qaar waxay u bedeleen qolalkooda xafiis shaqo.
- La shaqee shirkadle kale sidii aad u abuuri laheyd adeegyo cusub ama aad uhesho kooxo macaamiil cusub ah.
- La hadal lataliye ganacsi si aad u hesho fikradaha oo aad u hesho xallin. Startup Refugees, NewCo Helsinki iyo Suomen Yrittäjät ayaa ku siin kara adeeg caawimaada ah



oo ku baxo Af-Ingiriis, Finnish iyo Carabi.

Sida loo helo fikradaha wax soo saarka iyo adeegyada cusub

- Miyaad ka dhigi kartaa wax soo saarka ama adeegga, wax fiican, rakhiisan, oona dhakhso badan ama ka yar kuwa kula tartamaya? Miyaad isticmaali kartaa shey cusub, hanaan ama qaab aad wax ku gaarsiiso?
- La hadal macaamiishaada, asxaabtaada, deriskaaga, shurakadaada ganacsi iyo ganacsatada kale
- Maxay yihiin waxyaabaha / dhibaatooyinka ku dhibaya nolol maalmeedkaaga? Ogoow adiga kaliya inaad eheen.
- Ka deenso fikrad ka socota ganacsi kale markaas neh isku day inaa fikradaas ganacsigaaga u isticmaasho.
- 20% shirkadaha finnishka ah ee sameeya waxsoosaarka cusub, waxeey la wadashaqeyaan tartamayaashooda marka eey rabaan iney horumariyaan wax soo saarkooda.
- Xusuusnow, in xarumaha ELY iyo Business Finland ay hadda siiyaan shirkadaha si gaar ah deeqaha si ay u horumariyaan alaabada, adeegyada iyo howlaha cusub.
- Sameynta wax soo saarka ama adeegga cusub waxay noqon kartaa wax aa aad ugu baahan tahay waqtigaan hadda lagu jiro.
- Ganacsatooyin badan waxey sameeyen wax yaalo qosol badan ah intii lagu jiray xaaladaan xun oo karano feyrus sidii eey faa'iido usoo galiyaan ganacsigooda.

Daryeel macaamiishaada

- Macaamiisha ayaa sameysa ganacsigaaga. Ha ku cadaadinin dadka inay wax iibsadaan ama ha dirin farriimo quus ah. Taabadalkeed, sheeg waxa aad hada sameyneyso iyo sida badeecadaada ama howlahaagu u caawin karaan macaamiishaada adigoo fiirineysid xaaladda hada lagu jiro.



- Sii macaamiishaada wakhti ay ku bartaan xaalada cusub. Waxaa laga yaabaa inay soo iibsadaan alaabadaada mar dambe.
- Iska ilaali inaad macaamiishaada u isticmaasho dan fulis mise faa'iideysi.
- Ma bixin kartaa wax bilaash ah hadda oo aad sidoo kale ka faa'iideysatid?

Ma is leedahay fikrad fiican waaye in aad ganacsigaaga u badasho onlayn?

- Koow ka fikir inaad runtii u baahantahay in ganacsigaaga u badasho onlayn. Waad inaad ogaata iney ku haboonen nooc ganacsi walba onlaynka. Waa ikhtiyaar fiican inaad horey u ogaadid macaamiisha aad u xayeysiini laheyd inaa ganacsigaaga onlayn noqoni doonno.
- Meelo badan oo kaydiyayaal ah oo internetka ayaa bixiyo bilaash bilaawid ah. Hubi heshiisyadooda iyo waxa uu yahay qiimaha ka dib tijaabada bilaashka ah si looga fogaado dhibaatooyinka.
- Batoon kasta (habka mobiilka lacagta lagu bixiyo, nidaamyada bangiyada internetka iwm) ee ku yaal dukaanka internetka badanaa waa qaali dheeraad ah biilkuna waa bil walba.
- Dukaanka internetka ee cusub ayaa si fudud looga heli karaa Googleka kaliya 6-12 bilood ka bacdi markaad furato. Si aad u hesho aragti fog iyo dhakhso badan waa inaad iibsataa xayeysiiska Google ama aad u isticmaashaa warbaahinta bulshada si aad u gaarsiiso dukaankaaga macaamiil badan.
- Haddii aad heesato emaylyaasha macaamiishaada, waxaad toos ugu diri kartaa ayaga si suuq galiska kuula fududaado.
- Dadku waqti badan ayey isticmaalaan warbaahinta bulshada (facebook, instagram imw) maalmahaan. Waxaad uga sheegi kartaa badeecadaada ama adeegyadaada tusaale ahaan bogga Facebook-ga ayakoo sawirro ama fiidiyoow gaagaaban.

4 Taloyin ku saabsan maqaayadaha,



kafateeriyada iyo milkiilayaasha baararka

- Dowladda ayaa go'aamisay in dhammaan baararka, kafateeriyada iyo makhaayadaha ay xiran yihiin illaa 31ka Maajo. Tani macnaheedu waa macaamiisha looma ogola inay fadhiistaan waxna cunaan laakiin wali waa suurtoagal in la iibiyo cuntada la qaato ama loo geeyo cuntada guryahood.
- Dad badan ayaa aaminsan in warshadaha makhaayada ay si joogto ah isu beddali doonaan sababta oo ah fayraska corona. Marka weey fiican tahay inaad ka fikirtid habab cusub aad abuuri kartid.
- Hadda xaaladaan lagu jiro, makhaayadyaasha badan oo badbaadi karo kuwa la imaani karo hab cusub mise la qabsani karo xaaladdaha cusub. Tusaalo ahaan, inaad sameysid cunto cusub ee dadka guriga u qaadani karaan mise ugu geeni kartid gurigooda.
- K-market yaasha khaarkood waxeey bilabeen in makhaayadaha cuntadooda oo diyaarsan iibiyaan. Marka ma is leedahay in cuntadaada ka iibini kartid dukaanada cuntada.
- Qaar ka mid ah maqaayadaha ayaa bilaabay inay iibiyaan raashinka iyadoo loo eegayo culeyskooda qoysaska si ay uga caawiyaan quudinta carruurta aan helin cuntada iskuulka.
- Hal maqaayad ayaa bilaabay iney daaqaddooda ka iibiyaan cunto horay loosii qaato.
- Khasab uma baahnid dukaan internetka ah: waxaad amarro ku qaadan kartaa farriimaha qoraalka ah (SMS) waxaadna weydiisan kartaa macaamiisha inay horay ugaga bixiyaan Mobile Pay.
- Faa'iidooyinka makhaayadaha (foojarrada qadada) ayaa waxaa loo isticmaali karaa bixinta cuntada oo laguula keenayo guriga ilaa 31.8.2020. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Xafiiska Canshuuraha: Vero.fi

5 Linkiyaasha



Business Finland

Centre for Economic Development, Transport and the Environment

Finnish Institute of Occupational Health (FIOH)

Finnvera

Kela

Ministry of Finance

NewCo Helsinki

Suomen Yrittäjät / Entrepreneurs in Finland

TE Office















